## Maxaad sameeyn kartaa?

La kulmida naceybka ayaa ku sababi karo waxyeelo weyn iyo cabsida bulshooyinkeena. Haddii adiga, asaaxibtaada ama qoyska ballaarān ay saameysay hab dhaqanka naceybka ah, waa muhiim in la **taageero**, **la diiwaaniyo**, oo **soo sheeg**.

### 1. Taageerada

Iska hubi in adiga iyo dad walboo ay saameysay ay joogaan meel badqab ah, oo ka fog dambiilaha. Haddii aad tahay marqaati, cadeey in dadka (qofka) ay saameysay uusan kaligii aheyn iyo inaad halkaas u joogtid inaad iyaga taageertid.

### 2. Diiwaani

Cadeyn walboo la qoray ama laga dhowray dhacdada waxay noqoneysaa muhiimuld be important if haddii ay jiraan baaritaan. Haddii ay suurtogal tahay in sidaas si badqab ah lagu sameeyo, waxaad:

- Ka duub fiidiyow ama sawiro ka qaad dhacdada
- Kaydso wixii ah cadeyn muuqata
- Qor faafaahinta waqtiga, goobta, iyo dadka (ama qeexitaanada dadka) ku lugleh.

### 3. Soo sheeg

Si toos ah ayaad ugu soo sheegi kartaa hay'ada ama u sheeg qofka kuu dhow ee ku jiro maamulka ama qofka masuulka ah - tan ayaa noqon karto darawalka baska, illaalada amniga ama xafiiska soo dhaweynta. Waxaad sidoo kale u sheegi kartaa qof aad aaminsantahay cida taageeri karto oo ka kaalmeyn karto soo sheegida dhacdada.

**Soo wac 111 haddii qof uu halis ku jiro.**

Soo sheegida waxay ka caawisaa ku haynta bulshooyinkeena badqab, xooganaan, iyo la taageeray.

Te Kāwanatanga o Aotearoa
New Zealand Government

New Zealand Police
Ngā Pirihimana o Aotearoa

Crime Stoppers
Aukati Takahi Ture

Te Tari Taiwhenua
Internal Affairs

Manaaki Tāngata
Victim Support

netsafe
netsafe.org.nz

certnz

Te Kāhui Tika Tangata
Human Rights Commission

# Ka wada hor imaatinka ka dhanka ah naceybka Aotearoa

Naceybka wuxuu saameyn karaa qof walba oo wuxuu ku sababi karaa waxyeelo dhammaanteen, asabteena, qoyskeena ballaaran, iyo bulshooyinkeena.



**Haddii aad ka shakido inaad adiga, qof aad taqaanid, ama koox la bartilmaameedsaday sababtoo ah jinsigooda, diintooda, aqoonsiga jinsiga, dooqa galmada, da'da, curyaannimada, ama qeyb kale ee aqoonsigooda, waa muhiim in midaan la soo sheego.**

Naceybka waxaa lagu arki karaa hab dhaqano kala duwan. Laga bilaabo magac ugu yeerida waxyeelida illaa hanjabaadaha, dhibaateynta, ku xadgudubka onleenka, waxyeelada dambiilaha, weerarka, iyo xadgudubka galmada. Falalkaan waxaa loogu tallo galay inay waxyeelo ama cabsi u geysato dadka (qofka) iyo bulshada ballaaran sababtoo ah waxa ay yihiin.

Soo sheegida waxay yareysaa waxyeelada ay geysto naceybka iyadoo la sawirayo sawirka weyn ee sida naceybka u saameynayo wadankeena. Tan waxay u ogolaataa hay'adaha inay raadraacaan oo ka hortagaan habdhaqamada, sidoo kale sida in taageero la siiyo, kuwa ay saameysay.



# Soo wargeli

Haddii aadan soo sheegi, ma taageeri karno.

Waan fahamsannahay ka hadlida ku saabsan dhacdooyinkaan way adkaan kartaa. Kuwaan waa ikhtiyaaro badan oo aad soo wargelisid oo aad taageero u heshid, oo ay ku jiraan meesha aad si badqab ah oo qarsoodi ah aad uga hadli kartid.

## Booliska

Haddii qof uu halis ku jiro ama dhacdo ay hadda dhaceyso, soo wac 111 islamarkiiba.

Haddii dhacdada ay horaan u dhacday oo qofna uusan halis dhow ku jirin, ku soo sheeg onleenka ee **105.police.govt.nz**

## Netsafe

Netsafe waa urur madaxbanaan oo New Zealand, oo badqabka onleenka aan faa'iido doonka aheyn. Waxaad soo sheegi kartaa arimo ay ku jiraan xadgudubka onleenka, xoogsheegsiga iyo dhibaateynta.

Booqo **netsafe.org.nz/report**

Ama soo wac **0508 NETSAFE (0508 638 723)**

## Waaxda Arrimaha Gudaha: Ka hortaga Xagjirnimada Rabshada Onleenka

Kooxda Xagjirka Rabshada Dhijitaalka ee DIA ayaa masuul ka ah ka illaalinta reer New Zealand waxyeelada onleenka iyagoo ku jawaabayo oo ka hortagayo faafinta qoraalada la diiday ee sare u qaado ama dhiirogeliyo xagjirnimada rabshada ah.

Booqo **dia.govt.nz/Countering-Violent-Extremism**

## Joojiyayaasha Dambiga

Joojiyayaasha Dambiga waa samafal madaxbanaan ee bixiyaa iqtiyaar badqab oo qarsoodi ah oo lagu hadlo ama lagu soo wargeliyo.

Waxay u gudbin karaan macluumaad aad siiso urur sax ah oo aad rabtid inaad fahamtid waxa aad ogtahay, ma ahan cida aad tahay.

Booqo **crimestoppers-nz.org/report**

Ama soo wac **0800 555 111** si aad ula hadashid taleefon qabtaha waaya aragga ah.

## Guddiga Xaquuqul insaanka Te Kāhui Tika Tangata

Guddiga Xaquuqal Insaanka wuxuu bixiyaa adeeg bilaash ah, oo qarsoodi ah oo ka caawiyo weydiimaha iyo cabashooyinka ku saabsan takoorida sharci darada ah, dhibaateynta galmada iyo jinsiyada, iyo hadalka waxyeelada ah.

Booqo **tikatangata.org.nz**

Ama soo wac **0800 496 877**

## CERT NZ

CERT NZ waxay ka jawaabaan hanjabaadaha amniga intarnet-ka ee New Zealand. Waxay taageeraan dadka ay saameysay dhacdooyinka amniga intarneetka, oo ay siiso macluumaad iyo tallo.

Booqo **cert.govt.nz/report**

# Taageerada

Marnaba ma dareemeysid sida inaad kaligaa tahay. Waxaa marwalba jiro taageero la heli karo.

## Taageerada Dhibanaha

Haddii aad tahay dhibane dambi, dhibaato malahan sida halis u tahay, taageero ayaa la heli karaa. Taageerada Dhibanaha ayaa kaa caawin karo saameynada dareenka iyo mid la taaban karo ee dambiga oo ay bixiso macluumaad kaa caawinayo nidaamka sharciga.

Booqo **victimsupport.org.nz**

Ama soo wac **0800 842 846**

## Taageerada caafimaadka dhinmirka

Waxaa jiro illo iyo adeegyo kala duwan ee laguu heli karo, oo ay ku jiraan adeegyada taleefonka iyo onleenka iyo macluumaad, iyo taageerada waji ku waji.

Qadka Niyad jabka
Soo wac **0800 111 757**
Fariin qoraalka **4202**
Booqo **depression.org.nz**

1737
Soo wac ama fariin qoraal u soo dir **1737**
Booqo **1737.org.nz**

Qadka Dhibaatada Isdilka
Soo wac **0508 TAUTOKO**

Lowdown
Soo wac **0800 111 757**
Fariin qoraalka **5626**
Booqo **thelowdown.co.nz**

Qadka nolosha
Soo wac **0800 LIFELINE**
Text **HELP** ama **4357**
Booqo **lifeline.org.nz**

## Taageerada bulshada

Taageerada Xaafada
waxay La shaqeeyaan Booliska si loo wada keeno xaafadaha si loo abuuro bulsho badqab ah, adkeysi leh oo isku xiran.

Booqo **neighbourhoodsupport.co.nz**

Ama soo wac **0800 4 NEIGHBOURS**

### Saraakiisha Xiriirinta Booliska

Saraakiisha Xiriirinta Iwi
Waxay ka ciyaaraan door muhiim ah qorsheynta arrimaha dhaqanka oo waxay ka shaqeeyaan hormarinta xiriirada Booliska kala dhaxeeyo Māori.

Saraakiisha Xariirinta iyo Qowmiyada
Ee ka shaqeynayo bulshooyinka wadankoo dhan, waxay dhageystaan walaacyadaada oo waxay kaala shaqeynayaan hormarinta badqabka bulshooyinkaaga.

Saraakiisha Xiriirinta Kala duwanaanshaha
Waxay bixiyaan xiriirka u dhaxeeyo Booliska iyo dadka ku jiro bulshooyinkeena ee isu aqoonsado sida laga roone, laga roonad, daneeya nin-naag, nimoo-naag, labeeb iyo aan aheyn lab-dheddig.

Si loola xiriiro Sarkaalka Xiriirinta deegaankaaga, booqo **police.govt.nz/contact-us/local-contacts**